



MINISTRY OF HEALTH & HUMAN SERVICES
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA
بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

Maanta oo ah 08 Aug 2021, waxaa dalka soo gaaray 108,000 talaalka Oxford/AstraZeneca ee COVID-19. Tallaalkan waxaa Soomaliya ugu deeqday Dowladda Faransiiska iyada oo soo marisay xarunta COVAX (CEPI, Gavi, UNICEF, WHO), ujeedaduna tahay in dalka Soomaaliya laga saacido ka hortagga Caabuqa COVID-19.

“Dowladda Faransiiska, Midawga Yurub iyo xarunta iskaashiga ee COVAX waxay diyaar u yihiin in ay gacan wayn ka gaystaan sidii loo xoojin lahaa dadaallada kor uqaadida helida tallaalka Soomaaliya, si hawl-wadeenada safka hore kaga jira la dagaalanka caabuqa Covid-19 uga badbaadaan iyo dhamaan shacabka soomaaliyeed” ayuu yiri Aline Kuster-Manager oo ah Safiirka Faransiiska u fadhiga Soomaaliya.

“Deeqdan ayaa qayb ka ah dadaal caalami ah oo uu hogaaminaayo Dalka Faransiiska: Madaxweyne Macron wuxuu ballan qaaday inuu bixin doono 60 milyan oo tallaal ka hor dhammaadka sanadka 2021. Cudurkani waa musiibo caalami ah waxaana Faransa ka go'an hubinta si siman in loo qaybiyo tallaalka COVID-19 meel walba aduunka. Waa in wada-shaqeyn jirtaa si loo xakameeyo faafitaanka COVID-19”.

Ka dib markii uu cudurku dillaacay bishii Maarso 2020 ilaa iyo hada, Soomaaliya waxay xaqiijisay tiro gaareysa **15,735** kiis oo COVID-19 kana mid yihiin **837** dhimasho. Ilaa hada Dalka waxaa Tallaalka si buuxda u qaatay 1.8%, Waxaana laga maarmaan ah in kor loo qaado qaadashadda Tallalka, sidoo kale in la hubiyo in si siman loo siiyo tallaallada COVID-19 dadwaynaha.

“Imaatinka qaybtaan labaad ee tallaallada COVID-19 waxay ku soo aaday ayadoo lagu guda jiro waqti xasaasi ah oo uu caabuqa COVID-19 soo laabatay markii 3aad,” ayay tiri Dr Fawziya Abikar Nur, Wasiirka Caafimaadka ee Federaalka Soomaaliya. “Sida kaliya ee loo joojin karo faafitaanka caabuqani waa in la tallaalo dadweynaha. Waxaan uga mahadcelineynaa Dowladda Faransiiska deeqdan, waxaana ugu baaqayaa dhammaan Shacabka Soomaaliyeed in ay qaataan Tallaalka.

Dowladda Soomaaliya waxay sii wadi doontaa inay mudnaanta koowaad ee talaalka siiso hawl-wadeenada caafimaadka gaar ahaan shaqaalaha safka hore, Dadka waawayn, iyo dadka qaba xanuunada joogtada ah. Illaa iyo hadda, tiro lagu qiyaasay 186,094 qof oo ku nool Soomaaliya ayaa qaatay talaalkoodii kowaad halka 92,792 ay qaateen talaalkoodii labaad.

“Waxaan bogaadineynaa dadaalka Dowladda Faransiiska ay muujisay in si balaaran oo siman loo qeeybiyo tallaallada COVID-19 iyadoo la siinayo Soomaaliya talaalo aad loogu baahan yahay, ”ayuu yiri Maxamed Ayoya, wakiilka UNICEF Somalia. “Deeqdaani waxay muhiim u noqon doontaa kordhinta tirada dadka laga tallaalayo COVID-19, gaar ahaan shaqaalaha caafimaadka si ay u sii wadaan bixinta daryeelka Caafimaadka daruuriga ah ee carruurta iyo qoysaska Soomaaliyeed”

WHO iyo UNICEF waxay sii joogteyn doonaan garab-istaaga iyo wada shaqeynta kala dhexeeya Wasaaradda Caafimaadka si loo hubiyo badqabka Tallaalka, loona qaybiyo tallaallada iyadoo la xaqiijinayo habraacyada kaydinta Tallaaladda iyo tababbarka tallaalayaasha.

“Haddii aan ka cirib tirno caabuqa COVID-19 Soomaaliya, meel walba oo kale waan uga adkaan karnaa. Run ahaantii nuglaanshaha adeegyada Caafimaad ee dalka iyo tirada badan ee dadka aan wali talaalneyn, gaar ahaan dadka halista ugu jira caabuqa ayaa wuxuu sabababayaa in fayraska noqdo mid si fudud u faafa isla markaana waxay halis ugu jirnaa inay soo baxaan noocyo cusub oo fayras ah, haddii aynaan qaadashada tallaalka sare u qaadin. Tallaallada COVID-19 aad bay ammaan u yihiin waxtarkooduna aad buu usareeyaa waana rajada kaliya ee aan ku soo afjari karno Covid-19 Soomaaliya iyo meel walba, ”ayuu yiri Dr Mamunur Rahman Malik, wakiilka WHO ee Soomaaliya. “Waxaan uga mahadcelineynaa dowladda Faransiiska talaalada ay ugu deeqday dadka Soomaaliyeed.”

Wixii faahfaahin dheeri ah fadlan la xiriir:

| | |
|--|--|
| <p>Khadar Hussein Mohamud FMOH Head Coordination and Communication Email: coordination@moh.gov.so Tel: +252615602637</p> <p>Mukhtar A Shube, FMoH EPI Manager Email: epi@moh.gov.so Tel: +252615541871</p> | <p>Eva Hinds – UNICEF Communication Manager, Email: ehinds@unicef.org Tel: +252 613 642 635</p> <p>Fouzia Bano-WHO Chief of Staff ai, Communications Officer, Email: banof@who.int Tel: +252 619 235 880</p> |
|--|--|

----- **DHAMAAD** -----
08 August 2021.